# Xaashida Xaqiiqda: Da'yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah (YSHCN)

Dukumeentigan wuxuu jawaabo ka bixinayaa su'aalaha caamka ah ee ku saabsan barnaamijka Da'yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah ee Qorshaha Caafimaadka Oregon (YSCHN).

## Jadwalka Tusmada

**Xaashida Xaqiiqda: Da'yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah (YSHCN)....... 1**

Muxuu barnaamijkani daboolaa? ....... 3

Sidee baan ku ogaan karaa inaan u qalmo YSHCN? ....... 3

Sideen u codsadaa YSHCN haddii aan haysto OHP?....... 4

Sideen u codsadaa haddii aanan lahayn OHP? ....... 5

Waa maxay macluumaadka aan u baahanahay inaan bixiyo si aan ugu qalmo YSHCN? ....... 5

Sideen ku ogaan karaa inaan haysto dheefaha YSHCN? ....... 5

Sidee qofku u heli karaa taageerooyinka HRSN (Baahiyaha Bulsho ee La Xiriira Caafimaadka)? ........ 6

Miyey xubnaha YSHCN u baahan yihiin inay iska qoraan CCO-yada? ........ 6

Miyey macne samaynaysaa CCO-ga aan dooranayo? ........ 6

Miyey CCO-yadu go'aamiyaan waxa YSHCN daboosho, iyo sida? Tusaale ahaan, miyey CCO-yadu yeelan karaan siyaasadda "kii soo horreeyaa u xaq mudan" ama u adeegaan dadka qabo xaaladaha qaar marka hore? ... 7

Miyey tahay inaan cusboonaysiiyo dheefahayga YSHCN? ........ 7

Sidee dib u cusboonaysiinta dheefaha YSHCN u shaqeysaa? ........ 8

Waa maxay sababta YSHCN u dhammaato? ........ 8

Miyay YSHCN caymin kartaa daryeelka muddada dheer? ........ 9

Ma heli karaa YSHCN haddii aan leeyahay caymiska Healthier Oregon? .... 9

Ka waran haddii aan qabo su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan YSHCN? .... 9

Miyey CCO-yada ama bixiyayaasha looga baahan yahay inay bixiyaan adeegyada aan u baahanahay wakhti cayiman? ........ 9

## Muxuu barnaamijkani daboolaa?

Barnaamijka Da'yarta qabta Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka ee Gaarka ah (YSHCN) wuxuu daboolaa wax ka badan waxay daboolaan barnaamijyada OHP ee kale ee dadka waawayn. Wuxuu daboolaa dheefo la mid ah kuwa OHP uu daboolo ee carruurta, sida:

- Adeegyo dheeraad ah oo aragga iyo ilkaha ah, iyo
- Dhammaan daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah iyo kan caafimaad ahaan habboon.

Dadka haysta dheefaha YSHCN sidoo kale waxay u qalmi karaan dheefaha Baahiyaha Bulshada ee Caafimaadka. Waa la hubin doonaa inay u qalmaan dheefaha HRSN iyo sii wadashada YSHCN muddadiiba mar.

## Sidee baan ku ogaan karaa inaan u qalmo YSHCN?

Ma aha khasab inaad ka diiwaangashan tahay Oregon Health Plan (Qorshaha Caafimaadka Oregon) si aad ugu qalanto. Laakiin waa inaad buuxiso shuruudahan:

- Da'da: Laga bilaabo Janaayo 1, 2026, barnaamijka YSHCN waxaa loogu talogalay dadka da'doodu tahay 19, 20 iyo 21.
- Dakhliga: Dakhliga qoyskaaga soo galaa kama badnaan karo boqolkiiba 205 ee heerka saboolnimada fedaraalka (ilaa aad horeyba ugu qaadanaysay barnaamijka OHP heer dakhli oo ka sarreeya mooyee).

- Xaaladaha caafimaadka: Inaad qabto jirro dabadheeraatay oo adag, xaalad caafimaadka habdhaqanka ah, ama waxaa lagaa helay naafanimo soo bilaabantay intaadan gaarin 19 jir.

## Sideen u codsadaa YSHCN haddii aan haysto OHP?

Uma baahnid inaad buuxiso codsi cusub, laakiin waa inaad nala soo xiriirto si aan uga jawaabno su’aalaha ku saabsan u qalmitaanka haddii aad:

- Horaan ugu jirtay OHP,
- Da’daadu tahay 19, 20, ama 21 iyo
- Ku soo galo dakhli ka hooseeya boqolkiiba 205 Heerka Saboolnimada Fedaraalka (FPL).
- Waxaanu kuu soo diri doonaa warqad lagugu weydiinayo su’aalo ku saabsan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka laga bilaabo da’da 18.5. Waxaad la xiriiri kartaa caawiye codsi oo laga helo bulshadaada dhexdeeda si uu kuu caawiyo.
- Waxaad buuxin kartaa oo aad soo celin kartaa waraaqdan, waxaanu arki doonnaa inaad u qalanto waxaana kuu soo diri doonnaa waraaq ku saabsan u qalmiddaada.
- Waxaad kaga jawaabi kartaa su’aalaha onlayn adigoo u marayo akoonka ONE.Oregon.gov.
- Waxaad naga soo wici kartaa 1-800-699-9075 si aan uga jawaabno su’aalaha.

Haddii aad u qalanto, si otomaatig ah ayaynu kuu diiwaangalin doonaa markaad gaarto 19 jir.  Fadlan cinwaankaaga wixii iska beddela kolba nala socodsii si farriimaha aanu kuu soo dirayno aad u hesho.

Sidoo kale waxaanu isticmaali karnaa macluumaadka aanu hayno ee ku saabsan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka si aan u ogaanno haddaad u qalanto. Haddaanu ogaano inaad u qalanto, waxaanu kuu soo diri doonnaa ogaysiis oo aanu si otomaatig ah kaaga diiwaangalin barnaamijka.

## Sideen u codsadaa haddii aanan lahayn OHP?

Waxaad ku ogaan kartaa inaad u qalanto dheefaha YSHCN mar kasta inaad buuxiso arjiga OHP. Codsaduhu wuxuu noqon karaa madaxa qoyska ama ku tiirsane.

## Waa maxay macluumaadka aan u baahanahay inaan bixiyo si aan ugu qalmo YSHCN?

Waxaanu su’aalo kaa waydiin doonnaa baahiyahaaga daryeelka caafimaadka, laakiin ku waydiin mayno su’aalo gaar ah oo ku saabsan waxa lagaa helay. Kuma khasbanid inaad ka jawaabto su’aalahan. Laakiin haddii aadan ka jawaabin, ma garan karno inaad u qalanto iyo in kale.

Da’yarta qaarkood ayaa ogaaday inay u faa’ido badan tahay inay helaan macluumaad ku saabsan baahiyahooda daryeelka caafimaadka, ama waalid, daryeele, ama taageere la joogaa inuu ka jawaabo su’aalaha.

## Sideen ku ogaan karaa inaan haysto dheefaha YSHCN?

Waxaad OHP ka heli doontaa ogaysiis u qalmitaan haddii aad u qalanto YSHCN.

Waxaad sidoo kale ku ogaan kartaa inaad gasho akoonka ONE Online aadna eegto macluumaadkaaga dheefta ee bogga hore. Waxaad sidoo kale

wici kartaa 800-699-9075 (dhammaan wicitaanada gudbinta waa la qabanayaa, caawimo waxaa lagu heli karaa luuqado badan).

## Sidee qofku u heli karaa taageerooyinka HRSN (Baahiyaha Bulsho ee La Xiriira Caafimaadka)?

Xubnaha YSHCN waa laga baaraa baahiyaha HRSN. Baaritaanka ka dib, waxaa loo gudbiyaa barnaamijka HRSN si loogu sameeyo qiimeyn buuxda iyo diiwaangelin.

## Miyey xubnaha YSHCN u baahan yihiin inay iska qoraan CCO-yada?

Haa, ilaa ay leeyihiin xaalad qabiileed ama caymis caafimaad oo gaar ah mooyee.

Si aad wax badan uga ogaato CCO-yada, sida ay caawimo u bixin karaan, iyo waxa CCO kasta bixiyo, booqo qorshayaasha CCO.

## Miyey macne samaynaysaa CCO-ga aan dooranayo?

Qaybaha ugu badan ee Oregon oo kaliya waxay leeyihiin hal CCO, markaa waxa dhici karta inaad ikhtiyaar u lahayn inaad kala doorato CCO-yada kala duwan.

CCO kasta waxa dhici karta inuu si gaar ah iskugu dubbariddo daryeelka. Haddii tani ay muhiim kuu tahay, oo aad ku leedahay wax ka badan hal CCO aaggaaga, waxaa dhici karta inaad rabto inaad si taxadar ah u kala doorato.

Laakiin dhammaan xubnaha OHP waxaa waajib ah inay helaan heer daryeel oo isku mid ah. Tani waa run wixii CCO ah ee aad doorato ama haddii aadan lahayn CCO.

## Miyey CCO-yadu go'aamiyaan waxa YSHCN daboosho, iyo sida? Tusaale ahaan, miyey CCO-yadu yeelan karaan siyaasadda "kii soo horreeyaa u xaq mudan" ama u adeegaan dadka qabo xaaladaha qaar marka hore?

CCO-yadu ma go'aamiyaan waxa la daboolayo. CCO-yadu waxaa waajib ah inay daboolaan dheefaha YSHCN markay caafimaad ahaan daruuri yihiin iyo markay caafimaad ahaan habboon yihiin.  Haddii dadku u qalmaan diiwaangelinta oo ay u baahan yihiin daryeel, waa inay helaan daryeelkaas. Daryeel kasta oo hoos yimaada EPSDT lama diidi karo xitaa ka dib marka uu qofku gaaro 21 ama 22 jir sannadka 2026.

- Tani waxay ka dhigan tahay isbeddel weyn oo ku yimid bixiyeyaasha iyo sida daryeelka loo bixiyo.

## Miyey tahay inaan cusboonaysiiyo dheefahayga YSHCN?

Haa. Marka dheefahaaga caafimaad u diyaar yihiin cusboonaysiin, waxaanu boostada kuugu soo diri doonnaa waraaq. Waxay kuu sheegi in dheefaha si otomaatig ah loo cusboonaysiiyey ama waxay kuu sheegi haddii aad u baahan tahay inaad tallaabo qaaddo.

## Sidee dib u cusboonaysiinta dheefaha YSHCN u shaqeysaa?

Cusboonaysiintu waxay dhacdaa muddadiiba mar. Waanu kula soo xiriiri doonaa marka la gaaro wakhtiga dib u eegista u qalmitaankaaga.

Muddada cusboonaysiinta, waxaad noo sheegi kartaa haddii aad wali buuxisay shuruudaha YSHCN:

- Haddii ay haa tahay, waanu cusboonaysiin doonaa dheefahaaga YSHCN.
- Haddii ay maya tahay, waxaad u baahan doontaa inaad codsato YSHCN mar labaad.

## Waa maxay sababta YSHCN u dhammaato?

Cayminta YSHCN waxay dhammaan doontaa markaad gaarto 26 jir. Waxaad u guuri doontaa barnaamij OHP Plus oo kale ilaa laga gaaro wakhtiga laguu cusboonaysiin lahaa.

Caymintu waxay sidoo kale dhammaan kartaa markay dhacaan waxyaalaha sida:

- Ka guurista gobolka,
- U sheegista OHP inay xirto cayminta,
- Marka xabsi lagu dhigo,
- Marka dakhligaagu ka sare maro boqolkiiba 205 ee Heerka Saboolnimada ee Federaalka (FPL), ama
- Marka aadan lahayn baahi daryeel caafimaad oo ugu qalanta adeegyada.

## Miyay YSHCN caymin kartaa daryeelka muddada dheer?

Waxay ku xiran tahay xaaladdaada. Waxaad u baahan doontaa inaad ka waydiiso ONE Customer Service lambarka 1-800-699-9075 (dhammaan wicitaanada gudbinta waa la qabtaa, caawimo ayaa lagu heli karaa luuqado badan).

## Ma heli karaa YSHCN haddii aan leeyahay caymiska Healthier Oregon?

Haa.

## Ka waran haddii aan qabo su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan YSHCN?

Waxaad wax dheeraad ah ka ogaan kartaa barta **Oregon.gov/YSHCN**. Waxaad kaloo weydiin kartaa CCO-gaaga.

Dhammaan xubnaha OHP waxay ka wici karaan OHP Client Services lambarka 800-273-0557.

## Miyey CCO-yada ama bixiyayaasha looga baahan yahay inay bixiyaan adeegyada aan u baahanahay wakhti cayiman?

CCO-yada waxaa looga baahan yahay inay haystaan bixiyayaal ku filan si ay ugu adeegaan xubnaha. Tani waxaa ka mid ah bixinta daryeelka wakhtiga loogu talogalay.

Dukumintigaan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, daabacaadda farta waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. Kala xiriir Adeegga Macmiilka OHP lambarka 800-699-9075. Dhammaan wicitaanada sii gudbinta ah waa la aqbalaa. Caawimo ayaa lagu heli karaa luuqado badan.

Health Systems Division
Medicaid Programs
500 Summer Street, NE, E-35
Salem, OR 97301
Ask.OHP@odhsoha.oregon.gov
Oregon.gov/YSHCN

OREGON HEALTH AUTHORITY